DOONISTA ILAAH XAGGA NOLOSHII BANII-AADANKA

Ilaah wuxuu jecel yahay qof kasta oo wuxuu doonayaa in qof kasta badbaado. Jacaylka Ilaah wuxuu ka muuqdaa nolosha, dhimashada iyo sarakicidda Ciise Masiix, jacaylkaasoo loo muujiyey dunida oo dhan:

"Ilaah intuu dunida jacayl u qabay ayuu siiyey Wiilkiisa keliya oo dhashay in mid kastoo isaga rumaystaa uusan lumin laakiinse uu lahaado nolosha weligeed ah." [Injiilka sida Yooxanaa u qoray 3:16]

Amarka ugu weyn amarradana waa kan:

"Waa inaad Rabbiga Ilaahaaga ah ka jeclaataa qalbigaaga oo dhan, iyo naftaada oo dhan, iyo xooggaaga oo dhan, iyo caqligaaga oo dhan, deriskaagana waa inaad u jeclaataa sida naftaada." [Injiilka sida Luukos u qoray 10:27]

Eebbe wuxuu siiyey nebi Muuse Tobanka Amarradood oo socotaa:

Aniga waxaan ahay Rabbiga Ilaahaaga ah,
Aniga mooyaane ilaahyo kale waa inaanad lahaan.
Waa inaanad magaca Rabbiga Ilaahaaga ah si been ah ugu hadal qaadin, waayo, Rabbiga eedlaawe u haysan maayo kii magiciisa si been ah ugu hadal qaada.
Xusuuso maalinta sabtida, inaad quduus ka dhigto.

Aabbahaa iyo hooyadaa maamuus.
Waa inaanad qudh goyn.
Waa inaanad sinaysan.
Waa inaanad waxba xadin.
Waa inaanad deriskaaga marag been ah ku furin.
Waa inaanad damcin guriga deriskaaga, waa inaanad damcin naagta deriskaaga, ama addoonkiisa, ama addoontiisa, ama dibigiisa, ama dameerkiisa, ama waxa deriskaagu leeyahay oo dhan.

WAXAA GIDDIGIINBA SI SHARAF LEH LAYDINKUGU CASUMAYAA INAAD NOO TIMAADDAAN OO AYNU MIDKAYO WALIBA ISKU BARANNO KINIISADDA WACDINTA INJIILKA EE MAD-HABTA LUTHERANKA.

Waxaynu faraxsan ahay inaynu kaaga jawaabno su'aalahiinna.



Nabad!

Saaxiibkeenna qaaliga ahow,

Jameecaysigeenna kiniisaddan waxay kuugu soo dhowaynaysaa inaad kala soo qaybgashid Alla-caabudkeenna. Kiniisaddu waxay kaloo u furan tahay martida, iyo in lagu tukado wakhtiyada qaar.

Axad walba waxaynu ku kulannaa kiniisadda marka ay saacaddu tahay 10ka subaxnimo si loogu tukado oo Eebbe loogu caabudo, oo Eraygiisa loo maqlo oo laysku jameecaysto. Qof kastana waa lagu soo dhowaynayaa Alla-caabudkan.

WAXYAABAHA AASAASIGA U AH MASIIXINIMADA

■ QIRASHADA IIMAANKA

In Masiixiyiintu rumaysan yihiin hal Ilaah waxaa si kooban loogu sharraxay Qirashada Iimaanka. Ilaahan, oo isla mar hal iyo saddexmidnimo ah, waxaa loo yaqaannaa Abuuraha, Bixiyaha iyo Daahiriyaha.

Waxaan rumaysanahay Ilaaha Aabbaha ah,
Oo ah Qaadirka uumay samada iyo dhulka,
Iyo Ciise Masiix, oo ah Inankiisa madigaa, Inuu yahay Sayidkeenna,
In Ruuxa Qoduuskaa laga uuraystay, Oo uu ka dhashay Maryan oo bikraa,
Oo uu ku hoos silcay Bontiyos Bilaatos,
Oo iskutallaabta lagu qodbay, oo uu dhintay,
Oo la aasay, inuu maalintii saddexaad soo noolaaday,
Oo samada aaday, oo uu haatan fadhiyo gacanta midigtaa
Oo Ilaah Aabbaha Qaadirkaa;
Oo halkaasuu ka iman doonaa inuu xukumo kuwa nool iyo kuwa dhintayba.

Waxaan rumaysanahay Ruuxa Qoduuskaa,
Kiniisadda Ciise Masiix oo caalamigaa, ururka awliyada, cafiga dembiga,
Sarakicidda jirka, iyo nolosha daa'imiskaa.

■ TUKASHO IYO CAABUDAAD

Alla-caabudka Kiniisaddu wuxuu ka kooban yahay qaybo dhowr ah.
Waxaase sida caadadaa ku jira oo aan laga waayin "Cashadii Rabbiga" waa marka la xusuusanayo wixii Ciise Masiix ka dardaarmay in Masiixiyiintu sameeyaan.
Waxay caabudista Axad kasta halkan lagu qabtaa ka kooban tahay sidan soo socota:

Tukasho
Akhris ka imanaya Baybalka
Qirashada Iimaanka
Wacdi iyo tukasho
5-6 qasiidooyin oo jameecadu qaaddo
Cashadii Rabbiga
Xamdinaq iyo Alla-ammaan
Ducooyin

Waxaa Alla-caabud kasta oo laysugu yimaado ku jiraya tukashadii Ciise dadka baray:

Aabbahayaga jannada ku jirow, magacaagu qoduus ha ahaado,
Boqortooyadaadu ha timaado,
Doonistaada dhulka ha lagu yeelo sida jannada loogu yeelo.
Kibis maalin nagu filan, maanta na sii.
Oo naga cafi qaamahayaga sidaannu u cafinnay kuwa noo qaamaysan.
Oo jirrabaadda ha noo kaxayn, laakiin sharka naga duw.
Waayo, boqortooyada iyo xoogga iyo ammaanta adigaa leh weligaa.
Aammiin.

■ WAXYAABAHA QUDUUS AH: CASHADII RABBIGA & BAABTISMKA

Cashadii Rabbiga oo sida badan loo yaqaanno "waxyaabaha quduuska ah" waa mid ka mid ah muxaadarooyinka diiniga ah ee ay aamminsan yihiin Kiniisadda Wacdinta Injiilka ee madhabta Lutheranka. Muxaadiro-diimeedka kale ee aynu ayidsan nahay waxaa ka mid ah, "makhuuriska quduuska ah" ama baabtismka, taasoo uu dhaqan-geliyey Ciise Masiix qudhiisu markuu lahaa:

"Haddaba taga, oo quruumaha oo dhan xer ka dhiga, oo ku baabtiisa magaca Aabbaha iyo Wiilka iyo Ruuxa Qoduuskaa, oo bara inay dhawraan wax walba oo aan idinku amray, oo bal eega had iyo goor ayaan idinla joogaa xataa ilaa wakhtigu dhammaado." [Injiilka sida Matayos u qoray 28:19-20]
Marka qofka la baabtiiso wuxuu ka mid noqdaa jameecada Kiniisadda. Qofka qaangaarka ah ee doonaya inuu ka mid noqdo Kiniisadda waxaa la baraa waxyaabaha aasaasiga ah ee Masiixinnimada iyo nolosha Masiixinnimada ka hor inta aan la baabtiisin aan la mukhuurin.
Waxyaabaha kale oo muhiimka ah ee Kiniisaddu samayso waxaa ka mid ah qabashada aroosyada iyo duugta ama aaska.

Ciid sanadeedyada Masiixiyiinta waxaa wehliya dhacdooyinkii noloshii Ciise Masiix la soo gudboonaaday. Ciidaha ugu muhiimsan iyo asbaabahoodaba waxaa weeye kuwan soo socda:
Ciid-al-Masiix/Nataale: Waa maalinta uu dhashay Ciise Masiix
Jimcatal-Khayrku: Waa maalintii Ciise Masiix la qodbay
Iister/Baaska: Waa maalintii Ciise Masiix dhimashadii ka sarakacay.
Maalinta Samada-aadista: Waa maalintii Ciise Masiix samada galay
Bentekost: Waa maalintii Ruuxa Qoduuska ah xertii Ciise Masiix ku soo dul degay, iyo markii kiniisadda Ciise Masiix soo shaac-baxday.